

Log in

Email

Password

Log in

[Forgot your password?](#)

[Didn't receive confirmation instructions?](#)

[Didn't receive unlock instructions?](#)

[Sign up](#)

[A] [Sign In with FMS One](#)

FMSOne

Sida la'isu Qoro loona Saxiixo

[A] **ANNKISSAM**
An HHAeXchange Company

La cusbooneysiay Juun 2022

Tusmada

Hordhac	3
Waa maxay FMSOne ?.....	3
Ku Bilaabashada FMSOne	4
Abuur akoon FMSOne ah oo gal	4
Caawinta la socota FMSOne	7
Waxaan ilaaway erayga sirta ah (password).....	7
Hadda waa inaad isticmaashaa erayga sirta ah ee cusub mar kasta oo aad gashid saxiixidda.	9
Ma aan geli karo sababta oo ah akoonkayga lama xaqijin	10
Soo koobida Cusboonaysiinta Hagaha Isticmaalaha oo koobay	12

Hordhac

Hagahan waxa uu isticmaalaa erayyo si uu u qeexo dadka isticmaala **FMSOne**. Iyadoo ku xiran meesha aad ku nooshahay iyo barnaamijka aad ka qaybqaadanaysid, waxaad isticmaali kartaa erayyo kala duwan si aad naftaada isu qeexdid.

Adeegyada ku salaysan Guriga iyo Bulshada (HCBS) - Taageerada iyo adeegyada lagu caawiyo dadka inay noloshooda ku dhix-noolaadaan bulshooyinkooda.

Ka qaybqaatayaasha waxaa sidoo kale loogu yeeri karaa: Dadka howsha isticmaala, Macaamiisha, Xubnaha, Shakhxiyaadka, ama shirkaddaha loo shaqeeyo. Kani waa qofka hela Adeegyada Guriga iyo Bulshada ku salaysan.

Daryeel bixiyayaasha waxaa sidoo kale loogu yeeri karaa: PCA-yada, DSPs, PHWs, Kuwa shaqada qabta, ama Shaqaaleyaal. Kani waa qofka siiya Adeegga Ku-salaysan Guriga iyo bulshada ee Ka-qaybgalayaasha.

Wakiillada sidoo kale waxaa loogu yeeri karaa: Qoyska, Wakiillo/loo qaabeeyey, ama Goobo Taageero. Caadi ahaan waa saaxiib ama xubin ka mid ah qoyska ka qaybqaataha oo caawiya ka qaybqaataha inuu maareeyo daryelkooda.

Bixiyaha Adeegga Maareynta Maaliyadda (FMS) waxa kale oo loogu yeeri karaa: Dhedhexaadiye Maaliyadeed (FI), Wakiilkha Loo-shaqeeyaha Maaliyadeed (F/EA), ama Hay'adda Taageerada Maaliyadda (FSE). Kani waa ganacsi ururiya waraaqaha shaqo qorista, ka shaqeeya xaashida wakhtiyada shaqada, oo maamusha mushaharka ka-qaybgalayaasha.

Haddii aad haysid su'aalo ka dib markaad akhrisid buug-tilmaameedkan, Bixiyahaaga FMS, ama Maamulaha Kiiskaaga ayaa laga yaabaa inuu kaa caawiyo ka jawaabista su'aalahaas.

Waa maxay **FMSOne**?

FMSOne waa hal calaamat si aad si fudud oo badbaado leh ugu gasho akoonkaaga. Waxay kuu ogolaanaysaa inaad gashid aababka (apps) kaas oo uu Bixiyahaaga FMS ku siiyay isticmaalkiisa. **FMSOne**, waxaad keliya oo aad u baahan tahay inaad xasuuusato hal kugalitaan dhamaan aababka FMS-kaaga.

Ku Bilaabashada **FMSOne**

Abuur akoon **FMSOne** ah oo gal

Bixiyahaaga FMS ayaa bilaabi doona diyaarinta akoonkaaga. Tani waxay kuu ogolaaneysaa inaad gasho aababka (apps)-yada aad isticmaali doontid. Bixiyaha FMS waxa kale oo uu hubin doonaa in ka qaybgalayaashu ay si sax ah ugu xiran yihii daryeelayaasha iyo wakiillada.

1. Iisticmaale kasta waxa uu heli doonaa iimayl u sheegaya in akoonkooda la sameeyay, iyo sida loo dhameeyo habka is-diiwaangelinta. Iimaylkaan "casumada ah" waxa uu wataa tilmaamo muhiim ah dhammaan isticmaalayaashu waxay u baahan yihii inay raacaan si ay u dejiyan akoonadooda.
2. Iimaylka martiqaadku wuxuu ku weydiinayaa inaad iska diiwaan gelisid akoonka **FMSOne**. Waxaad u baahan tahay inaad gujiso "Guji Halkan si aad u Saxyixdid" lifaaqa isku xirka ee ku yimid iimaylka. Taasi waxay si toos ah kuu keeni doontaa bogga saxiixidda.

Hello Sully Sample,

You have been signed up to access the FMS One system. Our software uses FMS One to login and register users via a "Single Sign On" or "SSO" provider. After clicking the link below you will be directed to the FMS One provider's sign in page.

[Click here to sign up](#)

If you already have an FMS One account, click on the Sign In with FMS One account, click on the Sign In with FMS One button.

Jaantuska 1 - lifaaqa isdiiwaangelinta ee lagu muujiyay iimaylka.

Tilmaamaha Isticmaalaha FMSOne

3. Guji badhanka cagaaran ee **Saxiix (Sign Up)** oo ku yaala xagga hoose ee foomka.

The screenshot shows a 'Log in' page with the following elements:

- Email input field
- Password input field
- 'Log in' button
- Links for 'Forgot your password?', 'Didn't receive confirmation instructions?', and 'Didn't receive unlock instructions?'
- 'Sign up' button

Jaantuska 2 - Bogga saxiixa & badhanka saxiixa

4. Foomka isdiiwaangelinta ayaa soo bixi doona. Magacaaga iyo cinwaankaaga iimaylka ayaa lagu buuxin doonaa. Wuxaan u baahan doontaa inaad gelisid furaha sirta ah (Password), kadibna geli isla lambarkaas mar labaad si aad u xaqijisid. Kadib riix badhanka **Is-diiwaangelinta (Sign Up)** cagaaran.

The screenshot shows a 'Sign up' page with the following elements:

- Name input field (filled with 'Ursula User')
- Email input field (filled with 'tutorials+u@annkissam.com')
- Password input field (with placeholder '(6 characters minimum)')
- Password confirmation input field
- A message: 'By clicking Sign up, you are authorizing the HCBS organization associated with the above FI Code to use your FMS One account to log in to their system.'
- 'Sign up' button

Jaantuska 3 - Foomka Is-diiwaangelinta

5. Kadib markaad guj-siisid is-diiwaangelinta, waa inaad heshaa shaashad xaqijin ah oo kuu sheegaysa in akoonkaaga la oggolaaday. Waxaa sidoo kale jira lifaaq ku yaala boggaas si uu kuugu soo celiyo bogga galitaanka Bixiyaha FMS-ka.

If you signed up using an email from your HCBS provider, your account is automatically authorized. You can now sign in to their site by clicking the link below. You should receive a welcome email from your provider shortly with instructions on how to access their applications.


If you did not sign up from an email link, please contact your HCBS provider for further instructions.

[Return to Sign in page](#)

Jaantuska 4 - Shaashada xaqijinta

6. Wuxuu aad heli doontaa iimaylada soo dhawaynta app-ka kuwaas oo ka iman doona ciwaanka "no_reply@annkissam.com." Uma baahnid inaad ka jawaabtid iimayladaas. iimaylladaani waxay sidoo kale yeelan doonaan xiriir dib loogu celinayo bogga saxiixa bixiyaha FMS-ka. Waa in aad ku dartid bogga xusuusta ee kombiyuuterkaaga (bookmark) ee daaqadda raadinta (browser) bogga saxiixa si ay u sahlanaato in hadhow la galo. Tirada iimaylada soo dhawaynta aabka ee aad helaysid waxay ku xirnaan doontaa tirada codsiyada uu Bixiyaha FMS-ku ku siiyey gelitaanka
 - a. Dhammaan daalacashada way kala duwan yihii. Haddii aadan aqoon sida loogu daro bogga xusuusta ee bookmark, ka raadi qaybta caawinta ee daaqadda raadinta "bookmarks."

7. Waxaad hadda geli kartaa **FMSOne** adiga oo isticmaalaya **soo gal ka buluugga ah oo wata badhanka FMS One (Sign in with FMS One)**. Tani waxay ku siin doontaa gelitaanka dhammaan codsiyada ku salaysan mareegaha ee Bixiyahaaga FMS uu ku siiyay gelitaankeeda. Daryeel-bixiyeyaa shaqada iyagoo isticmaalaya EVV waxay sidoo kale awoodi doonaan inay isticmaalaan soo galkooda **FMSOne** si ay u diiwaangeliyan isbeddellada xilliyada shaqada iyagoo isticmaalaya aabka moobaylka **evvie**.



Jaantuska 5 - Ku gal badhanka FMS One

Caawinta la socota **FMSOne**

Waxaan ilaaway erayga sirta ah (password)

Haddii aad ilowdid eraygaaga sirta ah, way fududahay in dib loo sameeyo. Tag shaashadda calaamadda **FMSOne**. Kani waa lifaaqa aad ku calaamadsatay browserkaaga markii ugu horeysay ee aad saxiiday.

1. Calaamadda shaashadda hoose ee saxiixidda waxaa jira dhowr lifaaq. Lifaaqa ugu horreeya wuxuu leeyahay, "**Ma ilowday eraygaaga sirta ah? (Forgot Your Password)**". Guji lifaaqaas.

Jaantuska 6 – Muujinta shaashadda saxiixidda iyo erayga sirta ah ee la ilaaway

2. Tani waxay kuu keenaysaa shaashadda ma ilowdey ereygaaga sirta ah.

- Waxaad ku qori kartaa emailkaaga santuukha gujina badhanka hagaha ee **ii soo dir dib u samaynta ereyga sirta ah** (**Send me reset password instructions**)..

The screenshot shows a web page with a light gray background. At the top center, it says "Forgot your password?". Below that is a text input field labeled "Email" with a placeholder "Email address". Underneath the input field is a blue button labeled "Send me reset password instructions". To the left of the input field is a "Log in" link. Below the input field are two links: "Didn't receive confirmation instructions?" and "Didn't receive unlock instructions?". At the bottom left is a green "Sign up" button.

Jaantuska 7 - Shaashadda lloowshaha ereyga sirta ah

- Waxaad heli doontaa iimayl dhowr daqiiqo gudahood ah oo leh lifaaq aad dib ugu dejiso eraygaaga sirta ah. Haddii aad ku heli weydo iimaylka dhowr daqiiqo gudahood, hubi waxa loo yaqaan (spam email) ama galinka iimaylada qashinka ah soo gala ee iimaalkaaga.
- Guji lifaaqa **bedel furaha sirta ah** (**Change my password link**) ee iimaylka, taasina waxay kuu geynaysaa foom aad gelin kartid ereyga sirta ah ee cusub. Wuxaad u baahan doontaa inaad geliso erayga sirta ah hal mar, ka dibna mar labaad si aad u xaqijisid

The screenshot shows a web page with a light gray background. At the top center, it says "Change your password". Below that is a text input field labeled "New password" with a placeholder "(6 characters minimum)". Below the password field is another text input field labeled "Confirm new password". At the bottom is a blue "Change my password" button. To the left of the password fields are "Log in", "Sign up", "Didn't receive confirmation instructions?", and "Didn't receive unlock instructions?" links.

Jaantuska 8 - Shaashadda Beddel ereyga sirta ah

- Kadib markaad geliso erayga sirta ah ee cusub labada sanduukhba, jugsii Meesha midabka cawlanka ah ee badhanka **Beddel eraygayga sirta ah** (**Change my password**).
- Hadda waa inaad isticmaashaa erayga sirta ah ee cusub mar kasta oo aad gashid saxiixidda.

Hadda waa inaad isticmaashaa erayga sirta ah ee cusub mar kasta oo Aad gashid saxiixidda.

Koontadaada waa la xiri doonaa haddii aad geliso furaha sirta ah ee khaldan san jeer. Haddii aad isku daydid inaad gashid oo aad hesho fariin ah in akoonkaaga uu xiran yahay, waxaad codsan kartaa furaha akoontiga. Nidaamka ayaa si toos ah kuugu soo diri doona iimayl si aad u furtid akoontiga Haddii aadan taas heli Karin iimaylka kuugu jira santuukhaaga, ama in ka badan 24-saac ayaa ka soo wareegtay markii aad xirtay akoontiga, waa kan sida loo codsado iimaylka cusub ee dib ufuridda (unlock).

1. Shaashadda gelitaanka ee hoose waxaa jira dhowr lifaaq. Xiriirka saddexaad wuxuu leeyahay, **Lama helin tilmaamaha did u furista koontadaada? (Didn't receive unlock instructions?)**. Guji lifaaqaas.

The image shows a 'Log in' form with fields for Email and Password, and a 'Log in' button. Below the fields are three links: 'Forgot your password?', 'Didn't receive confirmation instructions?', and 'Didn't receive unlock instructions?' (which is highlighted with a red border). A green 'Sign up' button is at the bottom.

Jaantuska 9 - Shaashadda soo galka oo leh bidhaaminta furidda

2. Wuxaan ku qori kartaa iimaylkaaga santuukha oo guji batoonka **iigu soo celi tixraaca dib-u-gelidda (Resend unlock instructions)**.

The image shows a 'Resend unlock instructions' form with a field for Email and a 'Resend unlock instructions' button. Below the button are three links: 'Log in', 'Forgot your password?', and 'Didn't receive confirmation instructions?'. A green 'Sign up' button is at the bottom.

Jaantuska 10 - Dib u soo dir Shaashada furidda

3. Wuxuu doontaa iimayl dhowr daqiiqo gudahood ah oo wata lifaaq aad ku furato akoonkaaga. Haddii aadan helin iimaylka dhowr daqiiqo gudahood, hubi spam-kaaga ama galka iimaylada qashinka ah..
4. Guji **lifaaqa fur akoonkayga** (**unlock my account**) ee ku yimid iimaylka, taasina waxay ku geyn doontaa shaashadda saxiixidda ee **FMSOne**. Koontadaada hadda waa in ay furmatay, oo waxaadna isku dayi kartaa inaad mar kale dib u soo gashid.
5. Haddii ay dhibaato kaa haysato eraygaaga sirta ah, waxaad raaci kartaa tilmaamaha ku jira qaybtii hore ee buug-gacmeedkan si aad dib ugu samaysid eraygaaga sirta ah.

Ma aan geli karo sababta oo ah akoonkayga lama xaqijjin

Haddii aad aragtid fariin khalad ah oo ah in aan koontadaada la xaqijjin, waxay u badan tahay inay sabab u tahay dhibaato dhacday markii ugu horeysay ee aad saxiiday. Waxaad isku dayi kartaa inaad hagaajiso adigoo codsanaya tilmaamaha xaqijinta.

1. Shaashadda hoose ee saxiixidda gelitaanka waxaa jira dhowr lifaaq. Lifaaqa labaad wuxuu oranayaa, **Miyaadan helin tilmaamaha xaqijinta? (Didn't receive confirmation instructions?)**. Guji lifaaqaas.

The image shows a 'Log in' form with the following elements:

- A title 'Log in' at the top.
- An 'Email' input field with a placeholder 'Email'.
- An 'Password' input field with a placeholder 'Password'.
- A blue 'Log in' button.
- Links below the buttons:
 - 'Forgot your password?' (blue)
 - ' Didn't receive confirmation instructions?' (red border)
 - ' Didn't receive unlock instructions?' (blue)
- A green 'Sign up' button at the bottom.

Jaantuska 11 - Shaashadda soo Gelida oo leh xaqijjin la iftiimiay

2. Wuxaad ku qori kartaa emailkaaga khaanadda oo guji "Dib u dir badhanka tilmaamaha xaqijinta" (Resend confirmation instructions").

Resend confirmation instructions

Email

Resend confirmation instructions

Log in

Forgot your password?

Didn't receive unlock instructions?

Sign up

Jaantuska 12 - Dib u soo dir Shaashada Tilmaamaha Xaqijinta

3. Wuxaad heli doontaa iimayl dhowr daqiiqo gudahood ah oo leh lifaaq aad ku xaqijiso iimaylkaaga/koontadaada. Haddii aad ku heli weydo iimaylka dhowr daqiiqo gudahood, hubi spam-kaaga ama galinka qashinka.
4. Guji lifaaqa Xaqiji akoonkayga (Confirm my account) ee iimaylka ku yimid, taasina waxay ku geyn doontaa shaashadda saxiixidda ee **FMSOne**. Koontadaada hadda waa in ay noqoto la xaqijiyey, waxaadna isku dayi kartaa inaad mar kale soo gashid.
5. Haddii aad ku sii waddid inaad cillad ku heshid akoon aan la xaqijin, la xiriir BixiyahaFMS si aad u hesho caawimaad.

Soo koobida Cusboonaysiinta Hagaha Istimaaalaha oo koobay

Taariikhda	Cusbooneysii
7 Juun 2022	Hagaha Af-Soomaaliga oo la sii daayay
1 Febraayo 2022	Hagaha isticmaaluhu waa la sii daayay